# Qisaddii Raage Ugaas Iyo Wiilwaal

Qisadani waxey ku saabsantahay rag caan ah oo soomalida ku magac bixiyay, Abwaano iyo Talis xukumona isugu jira. Qisadani waxey ka bilaabatay Raage Ugaas iyo Nin uu gabadh ka doonay oo reer jigjiga ah, kadibse dad badan aafeysay. Raage Ugaas wuxuu ku dhashay ceelka sasabane ee ogaadeeniya, kana tirsan gobolka jarareed ee xarunta utahay Dhagax-Buur. Raage Ugaas wuxuu kasoo jeedaa qoys talin jiray oo ugaasyo ahaa badankood, aabihii Waa Ugaas Warfaa Faarax Samatar, Raage waxaa kor uga weynaa Walaalkii Xuseen oo isna Ugaas noqday.

*Qabqab dhaafay waa waxay laba qabiil, qaran ku waydaaye*
*Qaabiilba haabiil intuu, qoonsaduu dilaye*
*Qar hadumo qiyaamana hadhaco, qoysna yuu hadhine*
*Qacda waaga labadeena qolo, ha isu qaateene*
*Walee Faarax qooqaan ku dilay, qoomamayn mahayo*!

Denne fortellingen handler om to velkjente somaliske menn som heter Rage Ugas og Garad Faarax Garad Hirsi Wilwal. Rage var forlovet til ei pen jente som het Fadumo Nur. Hun var dattera til en velrespektert mann. For å gifte seg med Fadumo, måtte Rage komme med strutsegg, elefantstøttenner og en sort hest med ett hvitt merke i pannen. Fadumo var en av de peneste jentene på dette området, derfor kom mange menn som var interessert i henne. Men både Fadumo og faren sa at hun var forlovet med Rage, men til slutt kom Den mektige kong Farah Grad Hirsi Wilwal som ingen kunne si nei til og giftet seg med Fadumo, fordi Rage brukt så lang tid med å komme med gavene til Fadumo. Rage kom med alle gavene til Fadumus far, men det var for sent. Rage reiste til der Fadumo og mannen bodde, han drepte Wilwaal og tok med seg Fadumo. Rage har giftet seg med Fadumo, men noe år etter blei Fadumo drept av en løve.

Raage isagoo quwad qabiil, talis, iyo bwaanimo magac-dheer isugu darmatay ayuu qoodhsaday oo uu guur doontay. Wuxuu ilaalada kolba meel mariyaba, waxaa lasoo sheegay gabadh qurux badani inay jirta oo faadumo Nuur la yidhaahdo oo reer jigjiga ah, oo iyada laftigeedu qoys garaado iyo quwadba leh ah. Raage reerkii buu dhowr jeer tagay, si caadi ah isagoon danihiisa sheegan, ileen reerku ab iyo oodna midna makala foga, oo wax shaki ah ma beerin booqashada raage ugaas.

Raage dhowrkii jeer ee uu tagay soona hubsaday quruxda gabadha iyo asluubta ilaahay u dhameystiray, Jacayl ayaa qaaday hami guur.Gabayadii uu gabadha kula hadlay waagaas, hadaan mid kasoo qaadno waxaa ka mid ahaa,Gabaygani wuxuu cajiib ku yahay isagoon gabadha haa iyo maya midna ka heysan, ayuu raage isu badiyay dhankii mayada oo uu ka dhigayaa in gabadhu diiday, si uu ugu beer laxowsado, oo kolkaa intey naxdo ay haa u tidhaahdo durbaba.

*Alayl dhexe illayskii imaray ababa'daan mooday.*
*Ma Ugaaso nuur baa qalbiga waanka oogsadaye.*
*Ina abtaay nin aragaaaga jecel kuuna iman waayay.*
*Oo eed sokeeyiyo kabaqay uubatiyo qaylo*
*Oo oodi kaga meersantahay Aqalka aad joogto.*
*Arin sidaad ukala laasataan adi uun baa og.*
*Geeluba ugaasooy hadduu ayda miranaayo*
*Abeertiisa naaxdiiyo hadduu aaranku is waayo*
*Isaguba makala aamuusa waa isu olo-laaye*
*Hadaan ina adeereey ku idhi soo ma urugootid*
*Waan kugu adkeeyaye haddaad iga ajiibeyso*
*Ogoobay aduunyada ma jiro edeb wax dhaamaaye*

Raage jacaylkii qaaday iyo gabaygan oo dadkii ka dhawaa aga-gaarkaas deegaanku ahaa oo faafayba, waxey ku kaliftay inuu gabadha doonto. Xulufada raacday ee gabadha la doontay waxaa ka mid ahaa, Aw Muxumed Salal, Ugaas Xuseen, Aw Cumar, iyo Xirsi-Jabane Faarax-Cade. Qaabkii guurka loo soo mari jiray iyo arimihii

la is dhaafsan jiray oo dhan baa la isku af-gartay, Hadalna idinkuma deeqsiin karee, maaban idiin soo bandhigo Gabay muujinaya oo sawir wanaagsan ka bixinaya Guurka qurxoon, Waxaana tirshay geerarshihii weynaa ee la odhan jiray Weerar Bulxan Yuusuf, muddo isla beryahaas ku dhow. Wuxuu Yidhi Weerar Bulxan:

*Adoo dooba reer wacan hadaad doonto gabadhooda*

*Dalaaqaha hadii lagu xidhiyo meherka diinteena*

*Sida dowga dhaqankeenu yahay yarad hadaad deeqdo*

*Ood dalawa geel iyo fardiyo duunyo badan dhiibto*

*Todobaadka horre waa duciyo dadabgal kaagi dheh*

Sawirkaas korre ee Weerar Bulxan ina siin hayo, Ayuunbeynu ku tilmaami karaa qisada dhex martay Raage Ugaas iyo Qoladii uu Gabadha ka doontay. Waxaasa lagu xukumay Sadex xujood, oo Gabadha aabaheed ku xujeystay Raage Ugaas. Sadexdaas xujo waxaa ka mid ahaa, Faras Gallaalan, Ugxan Goroyo, iyo Ilig Maroodi.

Raage arintaas sahashayoo, howraarsan buu yidhi, dib buuna isu soo majiiray,Tashiga uu ku soo tegeyn yahay, hadii sadexdaas xujo soo furo, Inuu gabadha la wareegi dooni,wakhtiga uusoo sheegto isagu. Ugxan goroyo leh, oo geyigaas Ogaadeeniya aad ugu badnaa,Ilig maroodina lehel oo Wakhtigu wuxuu ku aadanyahay 1850-60’kii, oo Ingiriis iyo Xabashi midna ma xaalufinin, oo Ugaadhi waa tubantahay. Faraskii Galaalnaa ayaa la waayay, Faras Gallaalan hadaan idiin macneeyno, waa Faras Madow, Midab dhiin ahna ku jiro,Kobta sanqaroorka ahna Bar-cad ku leh.

Raage Ugaas wakhti dheer bay ku qaadatay iyo socoto dheer, iyo Kolba reer marti iyo meejii lagu sheegaba geyiga soomaaliyeed. Markii dambe ayaa lasoo sheegay in Faras Gallaalan uu heysto nin la odhan jiray Boqor Maxamuud Yuusuf (Xaawade), Oo Boqor Cismaan Aabihii ah.

Raage Ugaas isagoon cidna la tashan ayuu dhaqaaqay, Safar dheerna usoo galay inuu ninkaas is arkaan. Sida loo badanyahay oo dadka suugaanta iyo taariikhda

uruursha, Iyo qoyskii qisadani ku saabsaneyda, waxaa la isku raacay in Raage kolkuu reerka uyimid, uu iska dhigay nin dhaan-dhaaman oo maskax-dhiman ah.

Soomaalidu isuma gudbi jirin, oo Raage Ugaas inkastuu magac-dheeraa oo gabayadiisa la wada hayay, laguna halqabsan jiray oo hadalka maalinta madasha la joogo,lagu toosan jiray halku-dhagyadiisii. Hadana fursad buu u helay in qoyskii uu booqday ayna muuqaalkiisa garan.

Raage in maalmo ah ayuu reerka joogay, isagoo la leeyahay, Nin waalan oo dheer oo qurux badan baa inagaga yimid dhankaas galbeedka,Wuxuu udhukubaaba, maalintii dambe ayuu arkay Boqor Xaawade oo beeshiisa shir u qabanaya meel geed hoostii ah. Faraskiina wuxuu ku xidhanyahay meel geedka inyar u jirta oo gabadh uu boqorku dhalay baa la joogta oo yar, Raage intuu talaabo haldhaa qaaday buu faraska geedkii ka furay, kuna booday oo la fakaday.

Boqor Maxamuud Xaawade yaa intuu sheeda ka eegay faraskii oo sii boodhinaya yidhi, Walee Ninkaasi ma waala oo siduu fardo fuul uyahay baan arkaaye, War jiraase cakaara. Waa maalinta ay maah-maahdu baxeyso, Cakaarana waxey aheyd tuulo aad xadaaro badan oo boqorka hoos iman jirtay.

Raage Ugaas isagoo wada faraskii galaalnaa, ayuu soo istaajiyay sabada Sasabane,gabayna wuu ka tirshay ay niman uruursan uu kala hadlayay, iyo faraskuu soo dhacay, iyo In jidwaaq loo wada xoolahan, Wuxuu kale sheegayaa inuusan Raage aheyn nin gacan adag oo bixin haya, wixii la weydiisataba, siduu dooni haku keene. Wuxuu Yidhi Raage Ugaas:

*Faraskan shisheeyaha iyo u galay shuunka maxamuuda*
*Faraskaan markii laga shakiyay laba shanaad siistay*
*Faraskan sharabihiisii ku daray sidigtii dhool shaaxin*
*Waa shay mug le bagaan Jidwaaq ku shakamadeeyay*
*Nimankaad shaxayseen bagaan sharad ku beeneeyay*
*Shukrina waxan u naqayaa inaan shiqib ku weynaanin*

Raage Ugaas waxaa ukaamil noqday sadexdii xujo, oo maalinkaas gacantiisa ilaahay wada gashay, wakhti dheerse ku lumay, Ugxan Goroyo, Faras Gallaan, Ilig Maroodi. Raage intuu soo maqnaa ee uu arimahan lagu xujeeyay raadintooda jirayba, waxaa reerkii gabadhu joogtay ku dul wareegahayay Garaad Faarax Garaad Xirsi (Wiil-Waal). Garaad Faarax Wuxuu ahaa Boqor ka talin jiray Galbeedka Ogaadeeniya, Aadna caan u ah oo lagu bartay Xujooyin Maldahan iyo fiiro-dheer, Qabiil Quwad lehna dhex taagnaa. Garaad Faarax oo gabadha isna arkooday, aanse ogeyn in gabadhu doonantahay, ayaa dhowr jeer gabadha aabaheed weydiistay, wadaadkii baa ku jawaabay gabadhu waa doonatahay.

Garaad Faarax baa yidhi oo qolomey udoonantahay, Ninkeyse udoonantahay, Wadaadkii baa ku jawaabay, Gabadha waxaa ka xoola baxshay Nin Reer Ugaas Samata ah,Oo reer Ugaas Xirsi ah, oo Raage Ugaas ah. Garaad Faarax markuu maqlay in ninka gabadha doontay yahay Raage, horayna uga dhaxeysa halgaad-maanso iyo is af dhaaf,ayuu damac labaad oo waalan sii galay. Raage Ugaasna aad buu ugu raagay xujooyinkii loo diray, inkastoo oo uu ku guuleystay keenistoodii, hadana wakhti bay ku qaadatay, Garaad Faarax si uu yeelayba alla inaga oge, Wadaadkii intuu tiigsaday raage, Ayuu Gabadhii siiyay Garaadka.

Gabadhu inkastooyna ku qanacsaneyn guurka qasabka ah ee la siiyay garaad faarax, oo ay wali hamigeedu jiray Raage Ugaas iyo wada sheekeysigoodii hore, hadana hadalkii wadaadka unbay noqotoyoo, gabadha la guuri. Raage ayaa reerkii yimid, isagoo arimihii loo diray wada,gabadhii uu socdayna degantahay reerka oo dhowr biloodba la qabo, garaad faaraxna ku yahay inan layaal.Raage buulkii u horeeyay ee uu fooda soo gashay baa noqday kii gabadha, Biyo isiiya buu yidhi, Gabadhiina garatay ninkuu yahay oo way aqoonsatay, Raagena aqoonsay, Laakiin la isma wareysan, oo raage wali waa war-moog, Gabadhase wadnahaa loo dhaafay naxdin iyo argagax.

Raage oo geed fadhiya oo biyihii cabaya, Ayeey gabadhii intey orod balaw tidhi aabaheed keentay, Wadaadkii baa ugu tagay raage geedkii. Kobtii baa la isku

wareystay oo lagu kala war qaatay, Raage intuu cabaar aamusnaa, Marna istaagay, Marna fadhiistay, amakaag iyo fajac awgii, ayuu gabaygan marshay oo soomaali oo dhan ku caan baxay. Gabaygan wuxuu ina tusayaa, Umuurtan weyn ee lasoo gudboonaatay iyo dhibkuu soo maray, iyo sida uu rajeynayo inay wax isu badaleen, aama dhiig ha udaato ama si kale halagu keene. Wuxuu Yidhi Raage Ugaas, Allaha Uraxmee.

*Alleyl dumay albaabadoo laxidhay, uunkoo wada seexday*
*Onkad yeedhay uugaama roob, alif banaadiikh ah*
*Iihdayda bixibaa libaax iman lamoodaaye*

*Raggase adhaxda iyo ooftu waa udub dhexaadkiiye*
*Labadii waxlaga eegijiray waan ka awdnahaye*
*Halkaan aa ka leeyahay Illaah kaliya uun baa og*
*Aboodigu malalo garab haduu iin ku leeyahaye*

*Orod uma holado ooglihii adhaxda beelaaye*
*Ma aarsado il iyo oof nimay iimi kaga taale*
*Usha ma uu qaadan karo sheybihii arag darreeyaaye*
*Aroos Uma galbado nimuu wadnaha arami jiifaaye*

*Geeluba markuu oomo wuu ollol badnaadaaye*
*Sidii inan yar oo hooyadeed aakhirow hoyatay*
*Oo aabeheed aqal midkale meel illina seexshay*
*Hadba waxaan la urugoonayaa uurkutaalada e*

*Ninkaa ila xidhkiisii Nin kale eegay baan ahaye*
*Ninka illo biyaleh soo maree ooman baan ahaye*
*Ninka ooridiisii nin kale loo igdhaan ahaye*

*Amba Qaadka geediga kobtaan awrka marinaayo*
*orod kulama boodiyo anoo soo argaagaxaye*
*Ilaalada halkaan ka arda dhigi waan odorosaaye*

*Nin walaalkii Ugaas yahoo eedday baan ahaye*

*Nin abkii Ogaadeen yahoo aarsan baan ahaye*

*Afdhabaandhow aayar ninkaa aamusaan ahaye*

*Alle Gooyey oo nabi inkiray oo islaam ma ihi*

*Ninkaa oorideydii qabaa ubad haduu yeesho*

Hadii Tixdaas uu tiriyay Raage Ugaas, Wadaadkii intuu is garan waayay wuxuu ku hadlo, Ayuu Yidhi, Gabadha ka yar baan ku siine, Gabayga kobtaa ku jooji raagow. Raagena yeel oo gabadhii ka yareed baa la siiyay, Walise qalbigiisu min weyntii buu la jiraa uu dhibaatada usoo maray, ee uu xeebta salkeeda uga soo qaaday faraska. Raage isla qoyskii ayuu isna ku noqday inan layaal, Garaad Faaraxna waa inan layaal, oo labadii gabdhood baa lakala qabaa. Garaad Faarax oo tixda Raage ugaas ee Hub uruursiga ah maqlay ayaa si kibir ah ugu yidhi gabadhuu qaabay, Naa ani iyo raage geedkaas baanu kusoo shixiye, intaad si fiican usoo labisato, Ta kaa yar ee raage la siiyayna soo kaxee, oo qolqolka nagu soo dul mara Shaxdii iyadoo la jeexday,oo caadi loo ciyaarahayo, Raagase shafkiisu guuxayo cadho owgeed, ayeey labadii gabdhood soo dul mareen oo mida weyni aad ulabi santahay. Raage Ugaas baa aad il-qoodhka ula raacay, Garaad Faaraxna waa intuu rabaye, Raage Ugaas intuu ciil isla garan waayay ayuu tixdan bilaabay, labada dhinacna la is daba marsaday tixdo sababi doona dhiig daadashadii.

*Raage Ugaas Warfaa:*

*Geenyada inaan toociyaa ila gudboonayde*

*sidii guluf wax weeraray cidlaan gelelafaayaaye*

*Kannaan dagay*

*Garaad Faarax Garaad Wiil-Waal:*

*Geenyada nin lihi qoofashee qollolka meeraysa*

*Qiyaasli'i ninkii ugu tagow qoomamaa xigiye*

*Kannaan dagayRaage Ugaas Warfaa:*

*Geenyada nin lihi qoofashee qollolka meeraysa*

*Manala qoonsanaayaa haday fuulmo nooqabato*

*Kannaan dagay*

*Garaad Faarax Garaad Wiil-Waal:*

*Qumbe subaga oo meel qotoma oo nin lihi quuto*

*Qooraansigiisaa kuugu daran quud aan lacunaynin*

*Kanaan dagay*

*Raage Ugaas Warfaa:*

*Qumbe malaba oo meel qotoma oo rag wada quuto*

*Ma nalagu qoonsanaayaa haday gaajo noo qabato*

*Kanaan dagay*

*Garaad Faarax Garaad Wiil-Waal:*

*Nin adoogi dhawr qaalin dhalay qolona kaa fiican*

*Ma lagu qoonsanaayaa haduu gabadhi kaa qaaday*

*Kanaan dagay*

*Raage Ugaas Warfaa:*

*Nin adoogi dhawr qaalin dhalay qolona kaa liidan*

*Mala qoonsanaayaa haduu rubadda kaa qaado*

Raage oo kusoo gunaanaday "Mala Qoonsanayaa haduu rubada ka qaado" iyo tooridii oo uu dhuunta ka gashay Garaad Faarax ayaa is raacay, Sidaas ayuuna Garaadkii ku dhintay. Raage Gabadhii weyned ee uu horey u caashaqay ayuu faraskiisii weehad ahaa soo saartay, lana soo dhaqaajiyay. Gabayadii uu dib udiray iyo farimihii waxaa ka mid ahaa, hadan wax kasoo qaadano**:**

*Qab qab dhaafay waa waxay laba qabiil qaran ku waydaaye*

*Qaabiilba haabiil intuu qoonsaduu dilaye*

*Qar hadumo qiyaamana hadhaco qoysna yuu hadhine*

*Qacda waaga labadeena qolo ha isu qaateene*

*Walee Faarax qooqaan ku dilay qoomamayn mahayo***!**

Raage Ugaas isagoo gabadhii la aqal galay, Colaadna jirto labadii qoys udhaxeysa, Ayaa amar ilaahay , Libaax qaaday gabadhii, kobtiina ku geeryootay Allaha Unaxariistee. Raage Ugaasna wuxuu ka marshay Gabaygan Muruguda miidhan ah ee isna caanka ah, ee uu sheegan hayo in gabadh midaa udhiganta uusan waligiiba heli doonin:

*Sida koorta Yucub oo la sudhay, korommo buubaal ah*
*Ama geel ka reeb ah oo nirgaha, laga ka xaynaayo*
*Ama beelo keynaan ah, oo kor u hayaamaaya*
*Ama ceel karkaarrada jebshiyo, webi karaar dhaafay*
*Ama koox ardo ahoo quraan kaadibka u toostay*
*Ama habar kurkii iyo wadnaha, lagaga kaw siiyay*
*Ama kaal danley qaybsatiyo, kur iyo dhal yaabis*
*Shinni kaaluf galay ama siddii, koronkoroo oomi*
*Xalay kololo'aygii ma ladin, kaamil reeruhuye*
*Kunbulkiyo ardaagii miyaa, laygu kaliyeeyay?*
*Wixii laygu kuuniyay miyaa, igu karaamoobay?*
*Kunbiskii miyaa layga qubay, kolayo ii buuxay?*
*Maantana kataankii miyaa, layga kala qaaday?*
*Kob abaar ah meel dhexe miyaa, koore ila meeray?*
*Kub miyaan ka jabay biixiyaan, kabayo loo haynin?*
*Kun iyo kow kurtood dumar hadii laysu wada keeno*
*kolna waxaana heli karayn haween faadumoo kale'e*

Muddo aan xiligaas ka fogayn ayaa Raage Ugaas lagu dilay Dagaal aarsiya oo ay Wiilwaal qabiilkiisu soo qaadeen , Wuxuuna ku aasanyahay Meel Magaalada Fiiq inyar ka xigta Galbeed, Allaha Unaxariistee .

Qisaddan waxan ka soo xigtay Farah Geydh